

**Syaasadda Kaalmada Dhaqaale ee loogu
talagalay Baahiyaha Caafimaadka**

Hadafka OhioHealth waa horumarinta caafimaadka dadka aan u adeegno. Waxaan ku faraxsanahay inaan bixino Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka (FAP, Hospital Financial Assistance Program), kaas oo bixiya adeegyo bilaash ah ama qiimo dhimis loogu sameeyay bukaanada u qalma adeegyada degdega ah ama kuwa caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah. Bukaanka doonaya kaalmada dhaqaale waa inay codsadaan barnaamijka.

U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto barnaamijka, bukaanadu waa inay dhamaystiraan Codsiga Kaalmada Dhaqaale ayna buuxiyaan shuruudaha u-qalmitaanka dakhliga ku salaysan ee cayiman ama haddii kale ay awoodaan inay muujiyaan dhibaato dhaqaale oo weyn oo ka reebaysa bukaanka inuu bixiyo kharashka daryeelka la helay. Guud ahaan, bukaanada u qalma waxay leeyihiin dakhli qoys oo ah ama ka hooseeya 250% ee tilmaamaha saboolnimada federaalka mana haystaan ilo kale oo ay ka bixiyaan kharashka daryeelka. Iyada oo ku saleysan heerka dakhliga, qiimo dhimista ayaa u dhexeysa 100% - 60% ka baxsan mas'uuliyadda bukaanka ee daryeelka la helay. Marnaba ma dhacayso in bukaanka la go'aamiyay inuu u qalmo kaalmada FAP lagu dalaco in ka badan cadadka uu guud ahaan isbitaalku ugu soo dalaco daryeelka uu siiyo bukaanka caymiska kujira. FAP waxay quseysaa oo kaliya adeegyada uu soo dalaco OhioHealth Rehabilitation Hospital iyo adeegyada takhaatiirta ee uu ka helo bukaan isbitaalka.

Si aad u codsato

Nuqullada bilaashka ah ee Siyaasadda Kaalmada Dhaqaala iyo Codsiyada Kaalmada Dhaqaale waxaa laga yaabaa inay helaan:

- La xidhiidhida Maamulaha Kiiskaaga OhioHealth Rehabilitation Hospital
- Ka wacida Xafiiska Oggolaanshaha OhioHealth Rehabilitation Hospital (614) 484-9700
- Ka soo degso barta www.ohiohealth-rehab.com
- Adigoo ka codsanaya: Waaxda Maamulka Kiiska OhioHealth Rehabilitation Hospital, 1087 Dennison Avenue, Columbus, Ohio 43201

Boosto ugu dir codsigii la buuxiyay ama gacanta ugu gee: Waaxda Maamulka Kiiska OhioHealth Rehabilitation Hospital, 1087 Dennison Avenue, Columbus, Ohio 43201

Su'aalaha ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ama foomka codsiga (ay ku jirto kaalmada buuxinta foomka) waxaa laga yaabaa in wax looga qabto iyadoo laga wacayo Agaasimaha Maamulka Kiiska 614-484-9676.

Turjumaado

Nuqullada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee la turjumay, siyaasaddan oo kooban iyo foomka codsiga waxa lagu heli karaa Af-Carabi.

Nuqullada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee la turjumay, siyaasaddan oo kooban iyo foomka codsiga waxa lagu heli karaa Af-Faransiis

Nuqullada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee la turjumay, siyaasaddan oo kooban iyo foomka codsiga waxa lagu heli karaa Af-Jarmal

Nuqullada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee la turjumay, siyaasaddan oo kooban iyo foomka codsiga waxa lagu heli karaa Af-Jabbaan.

Nuqullada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee la turjumay, siyaasaddan oo kooban iyo foomka codsiga waxa lagu heli karaa Af-Kuuriyaan.

Nuqullada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee la turjumay, siyaasaddan oo kooban iyo foomka codsiga waxa lagu heli karaa Af-Mandarin.

Nuqullada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee la turjumay, siyaasaddan oo kooban iyo foomka codsiga waxa lagu heli karaa Af-Nepal.

Nuqullada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee la turjumay, siyaasaddan oo kooban iyo foomka codsiga waxa lagu heli karaa Af-Ruush

Nuqullada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee la turjumay, siyaasaddan oo kooban iyo foomka codsiga waxa lagu heli karaa Af-Somali.

Nuqullada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee la turjumay, siyaasaddan oo kooban iyo foomka codsiga waxa lagu heli karaa Af-Isbaanish.

Nuqullada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee la turjumay, siyaasaddan oo kooban iyo foomka codsiga waxa lagu heli karaa AF-Vietnamese.